

Qaab cusub oo ku sabsan sida loo dalbado gaadiidka dugsiga sannad dugsiyeedka 21/22

Annagu waxa aanu adiga ku xasuusinaynaa in aad adigan ah qofka masuulka ka ah ilmaha ama waalidka ah carruurta dhigata dugsiga hoose, marka laga reebo ardayda dhigata dugsiga gaarka ah, waa in aad ku dalbataa gaadiidka dugsiga adeegyadeena cusub ee elektaroonigga ah. Wax kaararka dugsiga ah lama diri doono ama dib looma buuxin doono in uun codsi la samayn mooyee.

Codsiyada sannad dugsiyeedka soo socda waa in la sameeyaa (15/3 – 6/4) si loo hubiyo in go'aanka ku saabsan gaadiidka dugsiga uu diyaar yahay bilowga sannad dugsiyeedka billaabmaya bisha agoosto.

Adeegga elektaroonigga ah waxaa laga heli karaa bogga internetka ee degmada laga billaabo (Taariikhda la soo bandhigayo) oo waxaana soo galidda lagu sameeynayaa aqoonsiga elektaroonig ah. Haddii aadan haysan aqoonsi elektaroonig ah, waxa aad ka helaysaa adiga bangigaaga.

Waqtigian hadda xaadirka ah, ardayda qoys aqaleed lagu meeleeayay iyo dadka leh tiro qofeed ku meelgaarka ah ayaa loo tilmaamayaa arjiga warqadda foomka ah. Foomka waxaa laga heli karaa:

Bogga internetka ee degmada: www.smedjebacken.se

Kaaliyaha gaadiidka dugsiga: skolskjuts@smedjebacken.se

Ogaal sheege: www.infomentor.se

Ujeedada isbedelka kan ahi waa, wax ay ka mid tahay in la wanaajiyo, khadka baska oo si fiican loo qorsheeyey iyo sidaas darteed saamaynta deegaanka oo yaraata iyo sidoo kale kharashka oo la yareeyo.

Haddii aad adigu qabtid wax su'aalo ah, waxa aad kula xiriiri kartaa kaaliyaha gaadiidka dugsiga dhanka e-mail.

skolskjuts@smedjebacken.se

Isku xidha: www.smedjebacken.se/skolskjuts